


Healthier Oregon iyo OHP Open Card ee Oregon Health Plan (OHP)

Janaayo 1, 2027, qorshahaaga caafimaad wuxuu isu beddeli doonaa OHP Open Card.

Caymiskaaga caafimaad ee OHP ma dhammaanayo. Wali waxaad heli doontaa OHP iyo faa'iidooyinka OHP ee la midka ah. Laakiin dhakhaatiirtaada ama bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka waxaa laga yaabaa inaysan aqbalin OHP Open Card. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad booqato bixiye kale.

Isbeddelkani wuxuu saameeyaa:

- dadka waaweyn ee haysta **fiisooyinka aan soogalootiga ahayn, xaaladda qaxootiga ama magangalyada**
- Inta badan dadka waaweyn ee haysta **heerka degenaanshaha joogtada ah muddo ka yar 5 sano**
- iyo dadka waaweyn iyo carruurta aan **lahayn xaalad socdaal oo u qalanta barnaamijyada kale ee OHP.**

Haddii ay tani ku saamayso, OHP waxay kuu soo diri doontaa ogeysiis bilaha **Oktoobar iyo Diseembar.**

Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?

Weydii dhakhtarkaaga, dhakhtarka ilkaha, iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka haddii ay aqbalaan OHP Open Card. Haddii ay sidaas sameeyaan, waad sii booqan kartaa.

Haddii aysan sidaas samayn, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad hesho bixiye cusub. Booqo **OHPOpenCard.org** si aad u hesho bixiyeyaasha aqbala OHP Open Card.

Laga bilaabo Janaayo 1: waxaad sidoo kale wici kartaa 800-562-4620 si lagaaaga caawiyo helitaanka bixiye caafimaad oo aqbala OHP Open Card.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli doontaa OHP bisha Oktoobar iyo Diseembar. Akhriso ogeysiisyadan. Waxay kuu sheegi doonaan isbeddelkan iyo waxaad u baahan tahay inaad sameyso.

Si aad wax badan u barato, booqo **Oregon.gov/HealthierOregon** ama wac Adeegyada Macaamiisha OHP 800-273-0557.

Qaabab iyo luqado kale: Waxaad ku heli kartaa dukumeentigan luqado kale, far waaweyn, farta indhoolayaasha ama qaab aad doorbidayso oo bilaash ah. La xiriir OHP cinwaanka **Ask.OHP@odhsoha.oregon.gov** ama 800-273-0557 (cod). Dhammaan wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa.

La cusbooneysiiyay Ogosto 7, 2026